

# Xogtaada hiddaha, dooqaaga

## Tilmaanta laguugu tallogalay haddii aad yeelatay falanqeynta hiddaha dhameystiran



NATIONALT  
GENOM CENTER

Taariiqda nooca: 28 Sebteembar 2021

### Maxaa ku dhaco xogtaada hiddaha?

Haddii aad yeelatay falanqeynta hiddaha dhameystiran ee la xiriirto daaweyntaada, xogtaada hiddaha waxaa lagu keydinayaa Nationalt Genom Center (Xarunta Genome ee Qaranka) Danish. Xogtaada hiddaha ayaa lagu keydiyaa Nationalt Genom Center (Xarunta Genome ee Qaranka) Danish oo daryeelka daaweyntaada awgeed. Xogta ayaa sidoo kale loo adeegsan karaa sida la xiriirto kormeerida, dacwadaha cabashada iyo magdhowga iwm. ee gudaha adeega caafimaadka.

Warbixinta bukaanka ee falanqeynta hiddaha dhameystiran ("Patientinformation om omfattende genetisk analyse"), waxaad ka aqrin kartaa waxbadan ee ku saabsan ujeedooyinka ee xogtaada hiddaha loo adeegsan karo. Waxaad sidoo kale ka aqrin kartaa wax badan ee ku saabsan Nationalt Genom Center (Xarunta Genome ee Qaranka) Danish ee [www.ngc.dk](http://www.ngc.dk).

### Xogtaada hiddaha - waxaad go'aansatay

Xogtaada hiddaha ayaa loo adeegsan karaa cilmi baarista *illaa* aad ka go'aansatid oo kaliya loo adeegsan karo daaweyntaada gaarka ah iyo ujeedooyinka sida tooska ah ula xiriirto daaweyntaada.

Waxaad midaan ku sameyn kartaa adiga oo iska diiwaangelinayo Goobta xogta Qaranka ee Ogolaansho La'aanta ee Isticmaalka Muunooyinka Unuga ee loogu tallogalay Ujeedooyinka Sayniska (Vævsanvendelsesregister). Waxaad isaga diiwaangelin kartaa koronto ahaan NemID ee [www.borger.dk](http://www.borger.dk). Sidoo kale waad buuxin kartaa oo aad gudbin kartaa foomka, taas oo laga heli karo bogga hoose. Waxaad sidoo kale ka saari kartaa diiwaangelinta diiwaanka haddii aad maankaaga badeshdid.

Suurtogal ma noqoneyso in la adeegsado xogtaada hiddaha ee mashaariicda cilmi baarista haddii aad ka diiwaangashantahay Goobta xogta Qaranka ee Ogolaansho La'aanta oo Isticmaalka Muunooyinka Unuga ee loogu tallogalay Ujeedooyinka Sayniska (Vævsanvendelsesregister).

### Warbixin gaar ah ee warbixinta hiddaha ee baaritaanada cudurada uurka

Haddii baaritaanka hiddaha dhameystiran lagu sameeyo sida waafaqsan baaritaanak cudurada uurka, erayga "warbixinta hiddahaaga" ee ku jirto foomkaan ayaa loola jeedaa labadaba warbixinta hiddahaaga iyo mida uurjiifka. Tani waxaa loola jeedaa inaad ka diiwaangelisid nafsadaada Goobta xogta Qaranka ee Ogolaansho La'aanta ee Adeegsiga Muunooyinka Unuga ee loogu tallogalay Ujeedooyinka Sayniska (Vævsanvendelsesregister) haddii aadan rabin warbixinta ka imaaneyso uurjiifkaaga iyo/ama nafsadaada inay kuu suurtoogasho in lagu isticmaalo cilmi baarista caafimaadka.

### Iska diiwaangelinta dhinaca boostada dhijitaalka ee [www.borger.dk](http://www.borger.dk)

1. Ku gal NemID
2. 'Skriv ny post' (qor warqad cusub)
3. 'Vælg modtager' (Dooor qaataha)
4. Cilmi baarista: "Sundhedsdatastyrelsen" (Maamulka Xogta Caafimaadka Danish)
5. Dooor: 'Til- og framelding til Vævsanvendelsesregisteret' (Iska diiwaangelinta iyo diiwaan ka saarida Goobta xogta Qaranka ee Ogolaansho La'aanta ee Adeegsiga Muunooyinka Unuga ee loogu tallogalay Ujeedooyinka Sayniska)

Tilmaamaha aad u sharaxan waxaa laga heli karaa websaydka: [https://sundhedsdatastyrelsen.dk/da/borger/selvetjening\\_og\\_services/brug\\_af\\_vaevsproever](https://sundhedsdatastyrelsen.dk/da/borger/selvetjening_og_services/brug_af_vaevsproever)



## Iska diiwaangelinta iyo diiwaan ka saarida Goobta xogta Qaranka ee Ogolaansho La'aanta ee Adeegsiga Muunooyinka Unuga ee loogu tallogalay Ujeedooyinka Sayniska (Vævsanvendelsesregister) ee la xiriirto xogta hiddaha ee Nationalt Genom Center (Xarunta Genome ee Qaranka) Danish

CPR nummer (Diiwaanka rayidka. lam.):

Magaca: \_\_\_\_\_ Taariiqda: \_\_\_\_\_

Wadada: \_\_\_\_\_

Koodhka boostada./caasimada: \_\_\_\_\_ Saxiixa: \_\_\_\_\_

Sax kaliya hal

Xogta\* hiddaheyga ayaa kaliya loo adeegsan karaa daaweynteyda gaarka ah iyo ujeedooyinka sida tooska ah ula xiriirto daaweynteyda.

Waxaan horaan u sheegay in xogta hiddaheyga kaliya loo adeegsan karo daaweynteyda gaarka ah iyo ujeedooyinka tooska xiriirto daaweynteyda. Waxaan hadeer u ogolaaday inaan u adeegsado ujeedooyin kale ee loogu ogolyahay sida waafaqsan sharciga Danish ee quseeyo.

Foomka waxaa loo soo diraa: Sundhedsdatastyrelsen, Vævsanvendelsesregisteret, Ørestads Boulevard 5, 2300 Copenhagen S  
Waxaad heleysaa helitaanka boostadaada dhijitaalka ee [www.borger.dk](http://www.borger.dk)

\*Ogow in haddii baaritaanka hiddaha dhameystiran lagu sameeyo sida waafaqsan baaritaanak cudurada uurka, erayga "warbixinta hiddahaaga" ee ku jirto foomkaan ayaa loola jeedaa labadaba warbixinta hiddahaaga iyo mida uurjiifka.